

Mulkiilahaagu kuguma saari karo cod dayactir ilaa **HADDII:**

Adiga ama martidaada waxay sababeen dhibaataada u baahan in la hagaajiyo adigoo u dhaqmaya si aan macquul ahayn

kiradaada aadan bixinin weli.

Hagaajinta dhibaataadu waxay u baahan tahay dib-u-qaabayn weyn oo u baahan inaad baxdo

Haddii mulkiilahaagu isku dayo inuu ku saaro, la-talin u waco Eviction Right

Mulkiilahaaga ayaa mas'uul ka ah...



- In meesha ahaato meel la hagaajiyo oo lagu noolani karo.
- Ilaalinta ammaanka iyo nadaafadda aagagga qof kastaa isticmaalo .
- Samaynta dayactirka sida heshiiska uu sheegaayo in lagu sameeyo wakhti macquul ah kadib marka la codsado.

Waxa laga yaaba in xoogaa dayactir ah adi sameyso hadi heshiisku sidaas yidhaahdo.

Sideen u codsadaa dayactir?

Had iyo jeer waa in aad **qoraal** ku codsatid dayactirka. U dir mulkiilahaaga warqad, iimayl, ama qoraal ay ku jiraan taariikhda iyo arrinta aad ka codsanayso mulkiilahaaga inuu hagaajiyo. Nuqul ka samee oo hay si aad u hesho caddaynta inaad samaysay codsiga.

Haddii mulkiilahaagu aanu ku samaynayn dayactirka wakhti macquul ah, waxa awood u leedahay inaad hore u joojiso heshiiskaaga oo aad ka baxdo. Marka hore wac Xaqa Ka saarida si aad talo u hesho..

Maxaa dhacaya haddii ay xaalad degdeg ah tahay?

Haddii shay muhiim ah jabo, sida nalalkaaga, kulaylaha, gaaska, biyaha, bulaacada, ama tuubooyinka, oo mulkiilahaagu aanu isla markaaba hagaajinin ka dib markaad qoraal kucodsato, waxaad leedahay xuquuq gaar ah iyo ikhtiyaarrada hoos yimaada sharciga. Looyar ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyo:

- Isticmaal qaar ka mid ah lacagtaada kirada si aad u dayactirto.
- Dacwee mulkiilahaaga.
- U isticmaal lacagtaada kirada meel kale oo aad degto inta aad sugayso dayactirka.

Ha joojin bixinta kirada sababtoo ah mulkiilahaagu ma samayn dayactir.

Kirada aad bixinin waxay inta badan jebisaa heshiiskaaga. Haddii ay taasi dhacdo, **mulkiilahaagu wuu ku saari karaa.** Haddii ay tahay inaad lacagtaada ku bixiso si aad u hagaajiso shay la rabo in mulkiilahaagu hagaajiyo, **garsooruhu wuxuu amar ku bixini karaa in lacagtada lagu celiyo.** Hayso rasiidhadaada si aad u muujiso inta aad bixisay.

Haddii gurigaagu aanu **ammaan ahayn** sababtoo ah dhibaatooyinka sida fiilooyinka, tuubooyinka, ama alwaax qudhuntay, waxaad wici kartaa Maamulka Metro Codes (615) 862-6590. Haddii ay **caafimaad darro** u tahay dhibaatooyinka sida qashinka, dhiqlaha, ama jirka, waxaad wici kartaa Waaxda Caafimaadka Metro (615) 340-5616.